



Xafiiska Mas'uulinimada 2008-2009

Adeegyada Umeerinta Bilaashka ah

Adeegyada Taageerka Waxbarashada (SES)

ARJIGA CODSIGA RASMIGA AH

Sidaad ugu Doorto • Hay'ad Umeerin • Ilmahaaga

FADLAN DEGDEG U FUR

Waqtiga Ugudambaynta:

JIMCAHA, OKTOOBAR 31, 2008

Gacaliye Waalidka/Koriyaha:

Dugsiga ilmahaaga — iyo dugsiga kasta ee Dugsiyada Dadweynaha Boston— wuxuu heegan u yahay hanasho heer sare ah ee ardayda idil. Himiladayada kowaad waa fidinta taageerka lama huraanka ah si loo xaqiijiyo in arday kastaaba helo fursado fara badan siduu u wanaajiyo xirfadihiisa ama xirfadaheeda tacliimeed.

Anagoo himiladaas madaxa ku hayna, waxan gacanta kuugu soo fidinaynaa inaan ku ogaysiino in **laga yaabo** ilmahaagu inuu u qalmo caawinaad tacliimeed oo dheeraad ah xaga sharciga fedraaliga ee waxbarashada ee la dhaho **ILMANA DIB LOOGAMA TEGAYO (NO CHILD LEFT BEHIND-NCLB)**.

Waxan rajaynaynaa in ardayda u qalanta oo idil iyo qoysaskooduba ka faa'iidaystaan fursadan waxbarasho.

Caruurta idil ee dugsiga ilmahaaga ee u qalma cunto bilaash ah ama qiimo jaban waxay u qalmaan inay helaan **Umeerin Bilaash ah**. Umeerintu waa caawinaad tacliimeed oo la bixin karo dugsiga kahor, dugsiga kadib, ama xiliga kulaylaha. Caawinaadan waxa bixiya fidiyayaal gobolku ansixiyey.

Waxan ku siinaynaa ogeysiiskan si laguugu caawiyo inaad faahamto sida umeeriyayaalku ay u caawin karaan ilmahaaga iyo waxa lagaa rabo inaad samayso sidaad uga faa'iido adeegyadan. Maaha qasab inaad ilmahaaga ku qorto barnaamijka umeerinta bilaashka ah, laakin waxan aad kuugu dhiiri gelinaynaa inaad ka faa'iidaysto fursadan.

Xaga Umeerinta Bilaashka ah, Adigu Waa Inaad Doorataa!

Waxad karaysaa inaad kala doorato adeegyo umeerineed oo kala duwan ay fidiyayaal ku bixiyaan meelo kala duwaan. Sidaas waxad talo ku go'aansanaysaa inaad ilmahaaga waxa ugu fiican u heshid.

Waxan kuu baryaynaa sanad dugsiyeed wanaagsan.



Carol R. Johnson
Agaasimaha Guud

**Fadlan buuxi oo ku soo celi arjiga diiwaangelinta dugsiga ilmahaaga ilaa
Jimcaha, Oktoobar 31, 2008.**

FIDIYEYAAKA ADEEGA UMEERINTA	QYBAHA BARNAAMIJKA	FASALADA LOO ADDEGAY	RUGTA UMEERINTA	AFAFKA QALAAD EE LOO
<u>ALLIANCE FOR INCLUSION AND PREVENTION</u> Xiriirka: Robert Kilkenny, Meg Smith Telefan: (617) 469-0074	Akhris, Qorid, Xisaab	6, 7, 8	DDH Irving , DDH Frederick Pilot	Waxba Hada
<u>ALTERNATIVES UNLIMITED, INC.</u> Xiriirka: Chris Battaglia Telefan: (410) 339-3945	Akhris, Qorid, Xisaab	K-12	Dugsi, Guri, Internet, Ganacsi, Xarun Bulsho	Waco wixi tafaasiil ah
<u>ANN'S CHRISTIAN LEARNING CENTER</u> Xiriirka: Denise Jeter Telefan: (617) 287-2332	Akhris, Qorid, Xisaab	K-8	Ganacsi, Dugsi, Xarun Bulsho, Rug Cibaado	Waco wixi tafaasiil ah
<u>AMERICAS SCORES - New England</u> Xiriirka: Dennis Wright Telefan: (617) 265-0066 xt. 134	Akhris, Qorid	3,4,5	Dusgiga Ardayga	Waco wixi tafaasiil ah
<u>BELL-BUILDING EDUCATED LEADERS FOR LIFE</u> Xiriirka: Brenda Braithewaite Telefan: (617) 282-1567, xt.134	Akhris, Qorid, Xisaab	K2-5	Dugsiyada Holland, Kenny, Mather, Mattahunt, Tobin, Trotter	Waco wixi tafaasiil ah
<u>BOSTON HIGHER EDUCATION RESOURCE CENTER</u> Xiriirka: Elizabeth Palma Diaz Telefan:(617) 442-5608	Akhris, Qorid	7-12	68 Northampton Street Boston, MA 02118	Isbanish
<u>BOSTON LEARNING CENTER</u> Xiriirka: Gary Bracey Telefan: (617) 265-7170	Akhris, Qorid, Xisaab	K-12	208 Ashmont Street, Dorchester, MA 02124, Guriga Ardayga, Dugsiga Ardayga	Isbanish, Hayshiyani Kiriyo, Kantonis, Mand
<u>BOSTON PUBLIC SCHOOLS</u> Xiriirka: Maureen Harris Telefan: (617) 635-9414	Akhris, Qorid, Xisaab	3-12	Dugsi	Fiyatnamiis, Hayshiyani, Kebfeerdi Kiriyo, Shiine
<u>BOSTON URBAN YOUTH FOUNDATION (BUYF)</u> Xiriirka: Christopher Troy Telefan: (617) 445-3380	Akhris, Qorid, Xisaab	6-12	Dugsi, Ganacsi	Waco wixi tafaasiil ah
<u>BRAINFUZE ONE TO ONE TUTORING</u> Xiriirka: Alex Sztuden Telefan: (866) 272-4638	Akhris, Qorid, Xisaab	3-12	Umeerin Internet	Isbanaish
<u>BRIENZA'S ACADEMIC ADVANTAGE</u> Xiriirka: Concetta Verge Telefan: (800) 581-0887/(978) 400-8651	Akhris, Qorid, Xisaab	K-12	Guriga Ardayga	Waco wixi tafaasiil ah
<u>C&M EDUCATIONAL CONNECTIONS AND CONSULTING</u> Xiriirka: Paula Nelson Telefan: (617) 282-9700	Akhris, Qorid, Xisaab	K-5	Ganacsi, Internet	Kiriyo, Isbanish, Soma
<u>CATAPULT LEARNING</u> Xiriirka: Telefan: (800) 417-3125	Akhris, Xisaab	K-8	Dugsiga Ardayga	Afafka Idil
<u>CITIZEN SCHOOLS</u> Xiriirka: Ned Rimer Telefan: (617) 695-2300	Qorid, Xisaab	5-8	Dever, Rugta Buslhada Dorchester, Garfield, Harbor, Irving, Mission Hill, DDH Shaw, DDH Wheatley, Akademiga Fasalka Sideedaad, Dugsiga Dhexe McCormack	Waco wixi tafaasiil ah
<u>CLUB Z! IN HOME TUTORING SERVICES</u> Xiriirka: Stephanie Mitchell Telefan: (781) 893-1862	Akhris, Xisaab	K-12	Dugsi, Guri, Internet, meel kale	Isbanish iyo kuwa kale
<u>COMMONWEALTH LEARNING CENTER</u> Xiriirka: Nancy Quinlan Telefan: (781) 444-5193	Akhris	1-12	Dugsi, Guri, meel kale	Waco wixi tafaasiil ah
<u>EDUCATE ONLINE</u> Xiriirka: Mikki Cruz Telefan: (212) 755-1070	Akhris, Xisaab	3-12	Dugsi, Guri, Internet, meel kale	Waco wixi tafaasiil ah
<u>GENERATIONS INCORPORATED</u> Xiriirka: Julie Sittler Telefan: (617) 423-5545	Akhris	1-4	Dugsi, Xarun Bulsho	Waco wixi tafaasiil ah
<u>GREENWOOD SHALOM OUTREACH COMMUNITY, INC.</u> Xiriirka: Tanna Preston Telefan: (617) 282-1464	Akhris, Qorid, Xisaab	K-10	378A Washington Street, Dorchester, MA 02124	Isbansih
<u>HUNTINGTON LEARNING CENTERS, INC.</u> Xiriirka: Julie Delucca Telefan: (800) 692-8400 x486	Akhris, Qorid, Xisaab	K-12	Dugsi, Ganacsi	Waco wixi tafaasiil ah
<u>LEARN-IT SYSTEMS</u> Xiriirka: Raquel Whitting Telefan: (410) 369-0000	Akhris, Xisaab	K-8	Dugsi, Rugaha Bulsho	Isbansih, Ingiriisi, Haysh
<u>PINNACLE LEARNING CENTER</u> Xiriirka: Steven Shapiro Telefan: (781) 828-2800	Akhris, Qorid, Xisaab	K-12	Dugsi, Rug Cibaado, Xarun Bulsho, meel kale	Isbansih, Shiine, Bortuq Jabanis,
<u>PRINCETON REVIEW K-12 SERIES</u> Xiriirka: Keri Hoyt Telefan: (800) 333-0369 x1340	Akhris, Qorid, Xisaab	1-12	Dugsi, Rug Cibaado, Xarun Bulsho, meel kale	Isbanish
<u>TENACITY, INC.</u> Xiriirka: Edward Eames Telefan: (617) 562-0900	Akhris	6,7,8	Umana Barnes, Naadiga Sportsmen's Tennis, Reggie Lewis Center, Boston Athletic Club, Harvard University	Isbanish
<u>THE MATCH MATH LAB</u> Xiriirka: Brandon Wong Telefan: (617) 232-0300	Xisaab	6,7,8	1001 Commonwealth Avenue Boston, MA 02215	Isbanish, Kiriyo
<u>THE YMCA OF GREATER BOSTON</u> Xiriirka: Wendy Zinn Telefan: (617) 536-7800	Akhris, Xisaab	K-5	Dugsi	Waco wixi tafaasiil ah

Guide to Providers

Massachusetts Department of Education and serve students in Boston

LO ADEEGAY	BAAHYAHA GAARKA EE LOO ADEEGAY	SAACADAHA UMEERINTA WIIGIIBA	SAACADAHA UMEERINTA SANADIIBA	MAALMAHA HAWLGALKA	HANAANKA UMEERINTA
	Naafonimo waxbarasho iyo dareenba	4 saac	46 saac	Isn-sab	Koox
	Waco wixi tafaasiil ah	4 saac	42 saac	Isn-Sab	Fool-ka-fool/Koox
	Naafonimo sahlan iyo mid dhexe ee waxbarashada	2-3 saac	31 saac-Qofkii/ 41 saac-Kooxdii	Isn-sab	Fool-ka-fool/Koox
	Waco wixi tafaasiil ah	3 sac	60 saac	Isn,Tal, Arb, Jim	Koox
	Waco wixi tafaasiil ah	8 saac	51 saac	Isn-Jim	Koox
	Naafonimo sahlan iyo mid dhexe ee waxbarashada	Waco wixi tafaasiil ah	58 saac	Waco wixi tafaasiil ah	Koox
Kiriyo, Kebfeerdi Arin	Naafonimo ADD, Dyslexia, ADHD, Autism iyo qaar kale. Waco wixi tafaasiil ah	2-3 saac	35 saac	Waco wixi tafaasiil ah	Fool-ka-fool/Koox
Kiriyo, Isbanish, Bortuqiis, Somaali	Baahiyaha gaarka ah oo idil waa loo adeegaa	4 saac	60 saac	Isn-Jim	Koox
	Waxba hada	Waco wixi tafaasiil ah	87 saac	Waco wixi tafaasiil ah	Waco wixi tafaasiil ah
	Waco wixi tafaasiil ah	2-3 saac	40 saac	Isn-Axad	Fool-ka-fool Internet
	Waco wixi tafaasiil ah	3 saac	46 saac	Isn-Jim	Koox
li, Shiine	Baahiyaha gaarka ah oo idil waa loo adeegaa	2-3 saac	41 saac	Isn-Sab	Koox
	Waco wixi tafaasiil ah	4 saac	35 saac	Isn-Kham	Koox
	Waco wixi tafaasiil ah	10-12 saac	72 saac	Isn-Kham	Koox
oo codsi ku xiran	Autism, Laxiriir Daahsan, Horumar Daahsan, Waxgarad, Dareenka, Neerfeyaalka, Shucuurta iyo waxyaabo kale oo codsi ku xiran	2-4 saac	40 saac	Isn-Axad	Fool-ka-fool/Koox
	Waco wixi tafaasiil ah	1 hour	30 saac	Isn-Sab	Fool-ka-fool
	Waco wixi tafaasiil ah	2-4 saac	40 saac	Isn-Axad	Fool-ka-fool Internet
	Waxba hada	2-4 saac	40 saac	Isn-Kham	Fool-ka-fool
	Naafonimada ADD, ADHD, Asperger's iyo naafonimada hadalka	2-4 saac	77 saac	Isn-Kham	Fool-ka-fool/Koox
	Waco wixi tafaasiil ah	Waco wixi tafaasiil ah	46 saac	Waco wixi tafaasiil ah	Waco wixi tafaasiil ah
niyan Kiriyo	Naafonimada ADD, ADHD	3 saac	45 saac	Isn-Sab	Koox
is, Faransiis, Kiriyo,	Naafonimada ADD, ADHD, Asperger's, Naafonimada waxbarashada hadaaqa, Xusuus la'aanta waqti gaaban	3-5 saac	38 saac Fool-ka-fool/ Koox yar 66 saac	Isn-Axad	Fool-ka-fool/Koox
	Waxba hada	3 saac	30 saac	Isn-Sab	Koox
	Waco wixi tafaasiil ah	4-5 saac	60 saac	Isn-Kham	Fool-ka-fool/Koox
	Naafada sahlan ama meel dhexe ee waxbarasho	2-4 saac	42 saac	Waco wixi tafaasiil ah	Waco wixi tafaasiil ah
	Waco wixi tafaasiil ah	4saac	80 saac	Isn-Jim	Koox

PROVIDER PROGRAM DESCRIPTIONS

ALLIANCE FOR INCLUSION AND PREVENTION

“Alliance for Inclusion (AIP) and Prevention” 9-ka sanadood ay iskaashiga la lahayd Dugsiyada Dadweynaha Boston waxay ku caawisay 700 ee ardayda dugsiyada dhexe inay aflaxaan, kuwaas oo ay ku jireen kuwo badan ee halis sare ugu jiray inay dugsiga ka saaqidaan. Hay’ada AIP waxay kobcisaa hagaajinta ardayga iyadoo fool ka-fool ama kooxo tiro yar siisa umeerin xaga Akhriiga, Qorida iyo Xisaabta. Barnaamijka Umeerinta AIP wuxu ka socdaa labo ka mid ah Dugsiyada Dadweynaha Boston.

ALTERNATIVES UNLIMITED, INC.

Umeerinta “Alternatives Unlimited” waxay bixisaa umeerinta xisaabta, akhriska iyo qorida ee ardayda fasalada K-12. Arday kasta waxa loo diyaariyaa qorshe waxbarid khaas u ah oo ku salaysan xuraanka imtixaan kahor laga qaado. Marka adeegyadu dhamaadaa kadib baa ardayda loo imtixaan si loo cabiro waxay tacliin korodhsadeen. Hay’ada AU waxay isticmaashaa manhajka “ENI’s iTarget Teach Fundamentals”, oo xiriiri la leh cabirada waxbarashada Massachusetts iyo degmooyinka. Waxay himiladoodu tahay inay taageeraan oo caawiyaan ardayda si loo hagaajiyo kartida qolfasalkooda hada jira iyo siday ugu hantaan aflaxaad sii saraysa kaararkooda warbixnta iyo imtixaanada gobolku ansixiyeyey. Iyadoo la siinayo waxbarid qof ahaaneed iyo kooxo kooban (5:1), ardayda hay’ada AU waxay horumariyaan xirfadaha asal ahaaneed ee bixiya saldhig adag xaga barashada fikradaha iyo tacliinta sii horukacsan. AU waxay bixisaa manhaj Ingiriisi iyo Isbanish ah; macalimiin laba-luqadle umeerineed baa loo diyaariyey inay la shaqeeyaan ardayda Isbanishka ku hadla.

ANN’S CHRISTIAN LEARNING CENTER

Hay’ada Ann’s Christian Learning Center (ACLC) waa xarun diin ku dhisan, oo bixisa umeerin fool ka-fool ah. Macalimiintayada aqoonta sare leh waxay u fidiyaan umeerinta ardayda fasalada 2-8. Ardayda waxa lagu dhiiri geliyaa iyadoo ka qaybgalka waalidka lala kaashanayo, in iyaguna ka qayb qaataan horumarinta himilooyin waxbarasho la taaban karo, iyo dhiiringelinta aan fidino xaga barnaamijyada wacyigelinta. Waxan abaal marinaa ardayda haday si wacan uga soo baxaan imtixaanada aan ku qaadno maamulka Xaruntayada iyo dugsigooda, heerarka ay sare u kacaan, dhamaystirka saxsan ee shaqa guriga, iyao inay la yimaadaa niyad sami.

AMERICA SCORES (New England)

Hay’ada “America SCORES New England” waa urur ku aflaxay horumarinta dhalinyarada oo isticmaala iskujir u gooni ah kubada cagta, qorida, iscabiraada hal’abuurka ah, iyo adeeg-barashada si loo baro xirfadaha akhris/qorida. Hay’ada SCORES waxay si iskaashi iskuxiran ula shaqaysaa toban iyo-laba barnaamij dugsi hoose ee Dugsiyada Dadweynaha. Ardayda SCORES ee fasalada 3-5 waxay gelinka dambe laba goor wiigii dhigtaan akhriska iyo qorida ee ugu yaraan toban saacadood bishii sanad dugsiyeedka oo idil. SCORES waxay ku dadaashaa inay u adeegto cunuga gebi ahaantiis iyadoo siinaysa taageer isu dheelitiran xaga akhris/qorida, jirdhiska iyo kobcinta shakhsiyadeed. Adeegyada waxa inta badan bixiya macalimiinta Dugsiyada Dadweynaha Boston iyo gacanyareyaal iyagu maamulaan. Waalidiinta waxa la siiyaa warbixino horukaceed marba mudo kadib waxayna shaqaaluhu diyaar u yihiin inay la kulmaan oo laga wadahadlo horukaca ardayga.

BELL-BUILDING EDUCATED LEADERS FOR LIFE

Qadiyada BELL (Building Educated Leaders for Life) waa kordhinta hanashooyinka waxbarasho iyo fursadaha nololeed ee caruurta ku nool bulshooyinka dakhliga hoose. Barnaamijka hay’ada BELL ee dugsi kadib waxay ugu fidiisaa Dugsiyada Dadaweynaha Boston mucaawanada umeerin akhris/qorid iyo shaqoguri gacan ku salaysan kooxo tiro yar Isniinta ilaa Khamiista, iyo oo kale hawlaha dhaqameed, safarada banaanka iyo adeega mashruucyada bulshada maalmaha

Jimcaha.

BOSTON HIGHER EDUCATION RESOURCE CENTER

Xarunta “Boston Higher Education Resource Center” (HERC), oo ah hay’ad diin ku salaysan kuna taal Roxbury, waxay fidiisaa umeerin, taageer tacliimeed, ku dayashada fiican iyo adeegyada u diyaarinta kuliyadeed caruurta iyo dhalinyarada Boston, Dorchester iyo Roxbury. Barnaamijkeeda umeerintu wuxu u fidiyaa kooxo tiro yar umeerin akhriiga iyo fananka af Ingiriisiga ardayda halista ku jira ee dugsi dhexe iyo dugsi sare. Waxay isticmaali doontaa istaratijiyadaha umeerinta tooska ah iyo barnaamijyada waxbarida lala kaashado kombiyuutarka ee caawiya manhajka Dugsiyadaha Dadweynaha Boston (DDB). Hay’ada HERC waxay la soo shaqaysay in ka badan 35 ee dugsiyada dadweynaha waxayna si wax ku-ool ah u caawisay arday halis ku jira – oo ay ku jiraan ardayda naafada ah iyo kuwa dabecadaha – si ay u hantaan tacliin ahaan loogana aqballo gelitaanka kuliyadaha.

BOSTON LEARNING CENTER

Adaan wax lacag ah bixin, hay’ada “Boston Learning Center” waxan ugu fidin karnaa umeerin ilmahaaga dugsiga ama guriga ardayda fasalada ku jira K-12. Waxay kalee bixiyaan barnaamij niyadgelineed oo la dhaho BIFF dhalinyarada 6-12. Barnaamijka BIFF wuxu leeyahay gelitaanka kuliyadeed oo lagu qiyaasay in ka badan 90% ardayda ku jirta, wuxuna u bedelaa dhicitaanka libin tacliimeed. Labaatan kii sanadood ee u dambeeyey, waxan u adeegnay 3,000 caruurta bulshadeena oo keenay natiijooyin heer sare ah. Barnaamijkayaga waxa weheliya manhaj khaas ah oo loo hindisay inuu daboolo baahiyaha arday kasta.

BOSTON PUBLIC SCHOOLS

Barnaamijka Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) wuxu bixiyaa 60 saacadood oo waxbarid kooxo kooban xaga akhriska, qorida iyo xisaabta ay bixiyaan macalimiin aqoon heer sare leh oo ka tirsan Dugsiyada Dadweynaha Boston. Umeerinta waxa lagu qabtaa dugsiyada ka tirsan DDB ee loo tusmeeyey inay u qalmaan umeerinta SES waxana la dhigaa dugsi kahor ama kadib. Qalab gaar ah baa loo xulay si looga jawaabo baahiyaha waxbarasho ee ardayda u kala gaarka. Arday kastaa wuxu leeyahay Qorshaha Aflaxaad Ardayga Ugaar ah (Individual Student Success Plan –ISSP) oo macalimiintu isticmaalaan si ay u wargeliyaan waxbarida. Waalidku waxay la kulmaan macalimiinta sadex goor sanadkiiba si looga wada hadlo krokaca cunuga.

BOSTON URBAN YOUTH FOUNDATION (BUYF)

Barnaamijka dugsi kadib ee “Boston Urban Youth Foundation” wuxu ku dadaalaa si loogu diyaariyo dhalinyarada maanta shaqada berito iyagoo siinaya horumar xaga tacliinta iyo dhaqanka. Hay’ada BUYF waxay heshay guulo fara badan xaga hagaajinta ka hawgelinta dugsiyeed, xaadiraada, kartida, iyo isudiyarinta kuliyadeed. Barnaamijyada dugsi kadib ee BUYF’s waxa ku jira:

1. Kulamo umeerineed ee la dhaho “Passkey” taaso ah in ardaydu wax u bartaan qofba xawliga tamartiisa iyagoo isla qaadnaya layliyo kombiyuutar ku dhisan taasoo xojinaysa xirfadahooda akhriska, fanaka luqada iyo xisaabta. Imtixaanada la qaado kahor iyo kadib baa lagu qiyaasaa kobcinta xirfadaha ardayda.
2. Qaadashada duruus fool-ka-fool ah iyo kooxaha kooban waxay fooda saaraan xoojinta xirfadaha ardayda ee fahamka akhriska iyo fananka luqada iyo layliyada qorida iyo oo kale doodo la hogaamiyo oo ku saabsan qoraalo kala duwan.
3. Balaarinta aqoonta iyo khibrada xaga siyasada, dhaqaalaha, iyo dhismeyaalka bulshada magaaladeena iyo aduunkaba.

BRAINFUSE ONE -TO-ONE TUTORING

Hay’ada Brainfuse, ardayda iyo macalimiintu waxay iskula xiriiraan waqti dhab ah oo ku salaysan qolfasalkayaga internetka ee sida sahlan loo isticmaalo. Hay’ada waxay laga heli karaa kombiyuutar kasta ee leh Brainfuse Internet-ka. Umeeriyaalkayagu waa macalimiin khibrad

leh oo haysta shahaadooyin ku salaysan taxane tacliimeed oo adag, oy ku jiraan hubinta diburaaca aqoontooda, dibuwaraysiyo badan, tijaabooyin xirfadeed, iyo tababaro xoogan. Waxay bixiyaan umeerin xirfadeed ay bixiyaan macalimiin aqoon u leh barida xisaabta, akhriiga, iyo habka “ESL”-ka (Fasalada 4-12). Warbixinada horukaceed baa sii joogto ah loo sameeyaa (waxana lagu dhiibaa afka hooyo ee waalidka).

BRIENZA'S ACADEMIC ADVANTAGE

Hay'ada “Brienza Academic Advantage” waxay lix iyo-toban sano siinaysay qoysaska adeegyada waxbarasho tayo saraysa leh. Barnaamijkoodu wuxu ka jawaabaa cabirada waxbarida iyo tacliinta ku jirta ay go'aamiso Waxada Waxbarashada Massachusetts. Waa falsafadooda in aqoonta tacliimeed ee ardayga la kobciyo iyadoo la raacayo isdhawrida sharaftiisa/sharafteeda; sida darteed, waxan abuuraa fursado waxbarid hodan ah oo taageerta tacliinta iyo is-horumarinta labada. Waxana xooga saarnaa sare uqaadida tacliimeed iyadoo isla markaas la dhisayo kalsoonida isdhawrida sharafta. Waa himiladayada inaan ugu fidino ardaydayada khibrad tacliimeed oo legdan leh meel jawi ababin iyo nabadgelyo leh. Waxan lafahayaga isku faaninaa tayada adeegyada aan bixino, tayada macalimiinta noo shaqeeya iyo tayada agabyada aan isticmaalno.

C&M EDUCATIONAL CONNECTIONS/T.H.R.I.V.E.

Hay'ada “C & M Educational Connections and Consulting (CMECC)” waxa la saasay 2006 waxana asaastay Ms. Paula Nelson, oo hore u ahayd macalimada dugsi dhexe ee arday iskudhafan kana ahayd macalimad Degmada Dugsiyada Daadweynaha Boston, iyadoo ictiraafay baahida loo qabo barnaamij dugsi kadib ee cilmi-baadhis ku dhisan ee ardayda ku liita xirfadaha akhriska, qorida iyo xisaabta. Sanadkii 2008 hay'ada “CMECC” waxay isu bedeshay magaca “T.H.R.I.V.E.”, siday si wacan ugu muujiso qadiyadeeda xaga caawinaada caruurta halista ku jirta iyo dhalinyarada siday si buuxda u hantaan heerka ugu sareeya ee kartidooda. Barnaamijka T.H.R.I.V.E. waa manhaj sanada oo dhan socda oo ku dhisan umeerinta oo bixiya umeerinta dibudhiska iyo kobcinta xaga akhriska, Fananka Af Ingiriisiga (ELA) iyo xisaabta oo lagu bixiyo Internetka, waxbarida ku dhisan kombiyuutarka, fool-ka-foolka iyo kooxaha kooban ee ardayda Fasalada 3-5 ee meel leh jawi nabad, kala-dambayn iyo hawlgelin.

CATAPULT ONLINE

“Catapult Online” waxay bixisaa, umeerin guriyeed, iyadoo isticmaalaysa qolfasalka ku dhisan isticmaalka sahlan ee “on-line”-ka. Khibrada hay'ada Catapult Online waxay muraayad u tahay waxbarid ardaydu isku qol ku jiraan oo isla markaas ardaydu diyaar u yihiin inay ka qayb galaan iyagoo la siinayo nabada iyo shakhsiyadooda qarsoodi ee laga helayo qolfasalka ku salaysan “on-line”-ka. Waxay ardaydu geli karaan barnaamij BILAASH ah ee kombiyuutar gaar ah ay bixiso hay'ada Catapult Online. Waxay ardaydu xaq u leeyihiin inay haystaan kombiyuutarka haday si buuxda u dhameeyaan barnaamijka (sida heshiisyada degmada/ fidiyuhu dhigayaan). Waalidku iyagaa dooranaya kaltanka ilmahooda oo guud ahaan ay ku jiraan 2-4 xisadood oo min 60-miridh ah wiig kasta. Hay'ada Catapult Online waxay ku haboon tahay ardayda fasalada 3-12. Hay'ada Catapult Online barnaamijkeeda ku salaysan cilmi baarista wuxu isticmaalaa waxbarid shakhsi ahaaneed iyo tabaha ka guulaysiga waxbarida si loo hagaajiyo xirfadaha ardayda ee akhriiga iyo xisaabta.

CITIZEN SCHOOLS

Barnaamijka “Citizen Schools” ee dugsi kadib wuxu ku caawiyaa ardayda 1) dhismaha xirfadaha muhimka ah ee xisaabta iyo qorida, 2) horumarinta qiimayaalka mudnaanta leh iyo awoodaha hogaaminta, 3) u diyaarinta guusha gelitaanka dugsiga sare iyo kuliyada, iyo 4) ka helitaanka khibrad shaqaalayn iyo ku dayashada dadka aqoonta u leh noocyo shaqooyin kala duwan. Iyagoo hoos jooga hogaminta shaqaale xirfad yaaqano tababar, ardaydu waxay “carbin” ka helaan nafhureyaal aqoon ku leh cilmiyo kala duwan, ay ku jiraan, arkitektuurada, ganacsiga, joornaalnimada, sharciga, iyo teknolojiga. Ardaydu waxay ku tababartaa xirfado tacliimeed waxayna isku xiraan waxbarashada dugsiga iyo guusha shaqo helida markay dhamaynayaan

mashruucyada tababarka aduunka dhabta ah, sida diyaarinta iyo ka doodka maxkamad maleegan, qorida iyo nashiraada wargeys, dibuhindiska rugaha tareenada dhulka hoos mara, abuurka bogaga webka, iyo qaar kaloo badan. Shaqaalahaqoonta leh waxay kalee ku caawiyaa dhamaystirka shaqaguriga waxayna si joogto ah ula xiriiraan macalimiinta dugsiyada.

CLUB Z! IN-HOME TUTORING SERVICES

Adeegyada “Club Z! In-Home Tutoring Services” waxay bixisaa umeerin fool-ka-fool khaas ah iyado ardaygu nabada gurigiisa joogo, waqtiyada u sahlan waalidka. Umeeriyaasha Club Z! waa macalimiin dugsiyada dadweynaha ama kuwa khaaska ah oo gobolka ruqsad ka haysta ama aqoonyahano jaamicadeed oo khibrad iyo umeerin u leh maadooyinka ay dhigaan. Club Z! waxay isku beegtaa umeeriyeyasha iyo ardayda iyadoo ku salaysa baahiyaha tacliimeed iyo shaqsinimada qof kasta u khaaska ah. Hanaanka waxbarida umeeriyaashu waa kuwo aad ugu gaar ah oo loo afjaray khaas ahaanta arday kasta.

COMMONWEALTH LEARNING CENTER

Hay'ada “Commonwealth Learning Center” waxay bixisaa umeerin fool-ka-fool ah ee akhriska loogu talgalay baahida arday kasta. Barnaamijkan umeerinta dugsi kadib wuxu ka jawaabaa baahiyaha ardayda ku liita akhriska iyo higaada. Arday kasta wuxu la shaqeeyaa macalinka ama macalinkeeda wuxuna arkayaa isla macalinkaas kulan kastaba. Umeerintu waxay xooga saartaa sida ardayda loo baro ‘xeerka’ (code) af Ingiriisiga-codadkeeda, noocyada xarfaha, qaababka, sharciyada, iyo xididada iyo sida waxa erayada ku lifaaqma-waxana lagu baraa dariiqo hanaan iyo tababar leh. Ardaydu saray wax u akhriyaan waxayna qaataan tababarada uyeedhiska kulan kasta. Macalimiinta barnaamijka haya'ada “Commonwealth Learning Center” waa khabiirto wata shahaadooyin la ansixiyey oo qaatay tababaro heer sare lehna khibradaha la shaqaynta ardayda ku liita akhriska iyo higaada. Waxan soo dhoweynaynaa ardayda waxbarashada dhiman iyo/ama kuwa dhibaato ka haysato unuglaanta waxbarashada.

FAILURE FREE READING

Hay'ada “Failure Free Reading” waa kahortag cilmi-baadhista baahinta badan ku dhisan ee loogu tala galay ardayda ku jira bilawga fahamka akhriiga, iyo dhibaatooyinka araybixinta iyo kartida kuhadalka. Barnaamijkan aad loo dhisay xaga horumarinta luqada wuxu ku salaysan yahay in ka badan 20 sano oo cilmibaadhis joogto ah waxana loo hindisay in la abuurto kahortag guul leh inay helaan ardayda la xarbiyaya akhriiga ee caadiyan ku xidhma min 0 ilaa 20-ka boqolkiiba.

“Failure Free Reading” waxay soo saartay isbedelo micno leh xaga tirooyinka wax akhriiga kartida koox-hoosaadyada ugu liita Maraykanka: waa kuwa dhaqaalaha hoose, tirada yar, waxbarashada gaarka ah iyo kartida kooban ee Ingiriisiga kuna jira liiska Hogaanka Gudiga Maraykanka ee la dhaho Carbiska Rajada (Promising Practice in Reading by the Education Commission of the States).

GENERATIONS INCORPORATED

Hay'ada “Generations Incorporated” waxay siisaa umeerinta fool-ka-foolka ah ee akhriska/qorida ardayda fasalada kowaad, labaad, sadaxaad, afraad, iyo shanaad ee Dugsiyada Dadweynaha Boston. Waxan ka fidinaa adeegyada meelo badan ee degmada Magaaloweynta Boston. Sidaad wax dheeraad ah uga ogaatid hay'adan, wac ama booqo website-kayaga: www.generationsinc.org

Umeeriyaalku waxay la kulmaan cunug kasta laba goor wiigii, oo xisadiiba tahay 40 daqiiqo, iyagoo isticmaalaya manhajka la dhaho “Tababarida Akhriska” (Reading Coaches). Umeeriyeyaal ku waa kuwo tabarsan laakin hada shaqada ka fariistay ee ka tirsan bulshada daneeyana akhris/qorida caruurta. Waxan ku cabirnaa natiijada barnaamijka “Tababarida Akhriska” anagoo isticmaalayna qaabka la dhaho “Basic Reading Inventory” (BRI), ee la maamulo laba goor. Ardaydayadu inta badan waxay sare u soo kacaan 2.5 xaga heerarka akhriska. Waxa soo raaca horukaca akhris/qorida, in ardaydu ka

faa'iidaan qaybta facyaalka isku dhexdhafan ee barnaamijkayaga tayada sare leh.

GREENWOOD SHALOM OUTREACH

“Greenwood Shalom Outreach Community (GSOC)” waa urur todoba sano soo jiray oo siiya dhalinyarada halista ku jira adeegyo kala duwan ee waxbarashada iyo taageerka. Barnaamijka “SES” ee GSOC wuxu fidiyaa umeerinta akhriiga, Fananka Af Ingiriisiga (ELA) iyo xisaabta iyadoo la kaashado caawinaada kombiyuutarka iyo waxbarida tooska ah ee fool ka-foolka ama kooxo yaryar. Hay'ada GSOC waxay aad ugu guulaysatay wanaajinta natiijooyinka tacliimeed ee ardayda halista ku jira, taasoo lagu qiyaasay qiimaynta la dhaho “Woodcock-Johnson kahor iyo kadib” iyo qiyaaso kaleba. Intii GSOC bilawday qiimaynta sanadkii 2003, ardayda idil ee GSOC wax umeerinaysay waxay sare ugu kaceen ugu yaraan .5 heerar fasaleed mudo lix bilood kadib, qaarkoodna waxay sare ugu kaceen ilaa 3.5 heerar fasaleed.

HUNTINGTON LEARNING CENTERS

Xarunta “Huntington Learning Center” waxay aaminsan tahay falsafada waxbarasho ee imtixaanid buuxda, manhaj aad u tayo sareeya, iyo waxbarida shakhsiyeed. Waxan soo xiganaa qaybo manhajyada ugu horeeye si aan u fidino waxbarashada taageerida wax ku-oolka ah ee suurtoagal ah xaga fasalada

K-12. Macalimiintayada idil waxa haystaan ugu yaraan Bakalooriyada jamicadeed waana inay qaataan “Huntington certification”. Barnaamijkayagu wuxu ku caawin doonaa ilmahaaga dhismaha xirfadaha waxbarasho ee manta oo waxtar u keenaysa inta noloshiisu jirto.

LEARN-IT SYSTEMS

Hay'ada “Learn-It Systems” waxay u fidisaa kooxo kooban waxbarida dugsi kadib, oy bixiyaan macalimiin tababar heer sare ah, oo ka ansaxsan gobolka oo ugu yaraan leh khibrad wax kadhigid dugsi mudo 2 sano ah. Ardayda ku jira barnaamijkan waxa marka hore laysku daraa intii isku heer fasal ah xaga maamulka kowaad ee lagu qiimaynayo qaab gaar ahaan loo sameeyey inuu shaabaha qiimaynta gobolka Massachusetts. Natiijooyinka qiimaynta kowaad waxay saldhig u tahay qorshaha waxbarida khaaska u noqonaya arday kastaba. Ardayda isku mid noqoto baahidooda waxbaridu baa markaas laysku daraa iyadoo loo qaybinayo bulshooyin waxbarasho oo tiro yaryar (kooxo) si loo siiyo fursada kobcinta ugu saraysa, isku faca wax wada baranaya, iyo kooxo leh isku manhaj iyo hawlgelin. Barnaamijyada “Learn-It Systems” waxay leeyihiin natiijooyin. Hay'ada “Learn-It” waxay caawisay kumaankun arday oo wadanka ku baahsan iyadoo bartay xirfadaha wax akhriiska asaliga ah iyo xisaabta ay u baahan yihiin siday ugu aflaxaan dugsiya iyo noloshaba.

PINNACLE LEARNING CENTER

Xarunta “Pinnacle Learning Center” waa mid magaalada laga leeyahay oo laga maamulo oo fidisa adeegyada taageerka waxbarasho ee Akhriiga, Qorida, iyo Xisaabta. Barnaamijka Pinnacle Learning Center waxa loo hindisay inuu ardayda ku caawiyo hanashada oo ka sii kordhiyo cabirada waxbarashada Massachusetts. Macalimiintayada khibrada sare, ee haysta shahaadadaha “MA” waxa loo carbiyey isticmaalka qalabka casriga ugu dambeeya iyo tabaha waxbarida si ay ugu caawiyaan ardayda inay hantaan barbarin xaga Cabirada Manhajka Massachusetts (Massachusetts Curriculum Frameworks) ee lagu qiyaaso Sahaminta Qiimaynta Buuxda ee Massachusetts (Massachusetts Comprehensive Assessment Survey). Barnaamijkayaga waxa ku jira latalinta hore ee waalidka/koriyaha, imtixaanka baadhista, xiriirka xooga ahna la leh macalimiinta iyo manhaj shakhsiyeedka loo hindisay in sida ugu koraysa loo qaado kartida ardayga.

PRINCETON REVIEW K12 SERVICES

Barnaamijkayada firfircoon ee hawlqabadka lehi wuxu hagaajiyaa hanashada ardayga reer Massachusetts isagoo xaqiijinaya in ardayda oo dhami helaan waxbarida laga rabo si sare loogu qaado xirfadahooda

akhriiga iyo xisaabta. Barnaamijkayaga ku dhisan waxbarida kooxo yaryar wuxu awood u siiyaa macalimiintayada haysta rukhsada “Princeton Review” inay arday kasta siiyaan daryeelka shakhsiyeed ee mid kastaa istaahilo. Iyadoo isha lagu qabanayo fikradaha ugu muhimsan ee xisaabta iyo akhriiga, Princeton Review waxay ardayda siisaa qalabka ay u baahan yihiin inay ku guulaystaan fasalka iyo noloshooda labadaba.

TENACITY, INC.

“Tenacity” waa urur guul ka dhaliyey horumarinta dhalinyarada Boston oo raadinaya “hagaajinta horumarinta tacliinta, qof ahaanta, iyo jir dhiska dhalinyarada magaalada iyadoo laysugu darayo taageer tacliimeed iyo wabarida/tartanka teniska ee xooga saaraya xirfadaha nololeed”. Barnaamijka Tenacity ee la dhaho “After-School Excellence Program (ASEP)” wuxu si iskaashi buuxda ula shaqeeyaa sidad dugsi ee Dugsiyada Dadweynaha Boston siduu ugu fidiyo ardayda dugsi dhexe ee “halista ku jira” barnaamij xoog leh ee sadex sanadood ah. Barnaamijka ASEP wuxu isku daraa horumarinta taageerka akhriiga/ akhri-qorida, xirfadaha nololeed iyo hawlaha jirdhiska/teniska oo lagu qabanayo jawi habaysan. Ardayda barnaamijka ASEP waxay tagaan sadex goor galabti wiig kasta mudo 30 wiig ah, markay ku jiraan sanad dugsiyada fasalada lixaad, todobaad, iyo sideedaad, oo iskujir dhan 290 saacadood sanad dugsiyeed kasta, iyo 90 saacadood xiliga kulaylaha.

THE MATCH MATH LAB

Hay'ada “MATCH Math Lab” waa barnaamij umeerin xisaabeed kooban oo la siiyo ardayda dugsiyada dhexe ee magaalada Boston oo ku salaysan barnaamij guul weyn laga gaadhay oo dhamaadka wiiga lagu bixiyo umeerin dugsi sare. Barnaamijku wuxu gebi ahaan ku tiirsan yahay umeerin shakhsiyeed ama kooxo yaryar oo macalin dhigo; anagu kombiyuutar ma isticmaalo sidaan wax u dhigno, laakin macalin iyo arday wada jooga way ku shaqayn karaan kombiyuutar. Waxan si habsami ah ugu caawinaa ardayda inay ka adkaadaan Cabirada Manhajka Xisaabta Massachusetts (Massachusetts Math Curriculum Frameworks), si ay ugu aflaxaan oo keliya maahane xisaabta imtixaanka MCAS ee fasalada 6, 8 ama 10, laakin inay keenaan tirooyinka “Karti leh” (Proficient) ama “Horukacsan” (Advanced). Barnaamijkayagu wuxu leeyahay shaqaale sadex kooxood oo kala duwan ka tirsan: a) umeeriyaal joogto ah (waa kuwa dhawaan ka soo qalin jebiyey jaamicadaha sarsare ee dalka; kuwani waa shaqaalaha joogtada ah ee Dugsiga MATCH), b) umeeriyaal ah ardayda kuliyadaha (ee ka socda M.I.T., Harvard, Kuliyada Boston, iyo Jaamicada Boston), iyo c) ardayda dugsiya sare ee MATCH.

THE YMCA OF GREATER BOSTON

Hay'ada YMCA ee Magaalaweynta Boston waxay fidisaa barnaamij dugsi kadib oo nabadgelyo iyo tayo leh oo daboolaya arrimaha hiddaha, dhaqanka iyo waxbarashada ee soo waajaha ardayda iyo waalidiinta reer Boston. Waxan kalee isticmaali doonaa namuunka akhri/qorida loo fidin doono ardayda “SES” hal saac maalin kasta, afar ama shan casho wiigii.

Waxan qaban doonaa hawlaha ay ku jiraan Kor Uakhri, Sare Uqayli, Shaqada Erayada, Qoraalka iyo Akhriiga Madaxbanaan (Read Aloud, Shout Out, Word Works, Writing and Independent Reading). “Read Aloud” waa waqtiga la horumariyo duluc ama maadad waana waqtiga dadka waaweyni fidin karaan namuunka akhriiska degdega ah, aamuska sare loogu fekero iyo tusida sida akhriiga u shaqeeyo. “Shout out, Word Works iyo Writing” waxa lagu isticmaala si loo siiyo ardayda isweydaarsi joogto ah. Waxan isticmaali doonaa buugagta la xiriirta “The 100 Book Challenge”, ee kuu lug leh akhriiga madaxbanaan ee 30-45 daqiiqo.

(Wac xiriirada si aad u samaysato balamo umeerin iyo tafaasiisha adeega maalmaha iyo saacadaha)

Wixi xog dheeraad ah ee umeeriyaaalka waxa laga heli karaa Waaxda Waxbarashada Massachusetts website-keeda: <http://www.doe.mass.edu/ses/>

Free Tutoring (SES) is available at the following schools:

Elementary SES Schools

Agassiz
Bates
Beethoven
Blackstone
Channing
Chittick
Condon
Dever
Ellis
Emerson
Everett
Farragut
Fifield
Gardner
Garfield
E. Greenwood
Grew
Guild
Hale
Haley
Hamilton
Harvard/Kent
Hennigan
Higginson
Holland
J. Kennedy
P. Kennedy
Kenny
Lee Elementary
Marshall
Mather
Mattahunt
O'Donnell
Ohrenberger
Otis
Perkins
Quincy
Roosevelt
Shaw
Sumner
Trotter
Tynan
Winthrop

Elementary/Middle Schools

Curley K-8
Eliot
S. Greenwood
Hernandez
Hurley
Jackson-Mann K-8
Lydon
McKay
Mission Hill
Murphy
Orchard Gardens
Tobin
Warren-Prescott
Young Achievers

Middle Schools

Dearborn
Edison
Edwards
Frederick
Gavin
Harbor
Irving
King
Lewenberg
Lewis
McCormack
Mildred Avenue
Rogers
Timilty
Umana/Barnes
Woodrow Wilson

Middle/High Schools

Upper School

Quincy Upper School

High Schools

Burke
Charlestown
Community Academy of
Science
East Boston
English
Madison Park
Media Communications &
Technology
Noonan Business
Odyssey
Parkway Academy
The Engineering School
Urban Science Academy

Special Schools

McKinley

Su'aalo & Jawaabo

Xaga "SES" Umeerinta Bilaashka

Waa maxay barnaamijka umeerinta bilaashka ah ee "SES"?
Adeegyada Taageerka Waxbarashadu (*Supplemental Education Services -SES*) waa barnaamij dawlada fedraaliga maal geliso oo qayb ka ah sharciga Ilmana Dib Loogama Tegayo (No Child Left Behind -NCLB) ee siiya umeerin *bilaash ah* ardayda u qalma cunto bilaash ah ama qiimo jaban ee dugsiyada qaarkood. Umeerinta waxa la siiyaa ardayda u qalma waqti ka baxsan maalin dugsiyeedka caadiga ah waxana bixiya fidiyeyaal kala duwan. Barnaamijyada waxa waxa loo habeeyey si loo caawiyo hagaajinta xirfadaha ardayda xaga akhriska, qorida iyo xisaabta. Hadii ilmahaagu u qalmo barnaamijka, kharashka adeegyada waxa laga bixinayaa maaliyada dawlada fedraaliga ah ilaa lacag dhan \$2,076.21.

Sidee ku ogaanayaa inaan u qalmo umeerinta SES?

Waad u qalantaa, hadii :

1. Ilmahaagu ku jiro dugsiyada dadweynaha Massachusetts ee loo magacaabay inay u qalmaan umeerinta SES, ee ku salaysan natiijooyinka kartiyeed; IYO
2. Ilmahaagu u qalmo cunto bilaash ah ama qiimo jaban; IYO
3. Ilmahaagu ku soo celiyey arjiga codsiga cuntada bilaashka ah ama qiimaha dugsiyiisa ama dugsiyeeda.

Qoysaska daboolaa sadexdaas shuruudood waxay u qalmaan inay is qoraan umeerinta SES. Fadlan ogow in maadaam lacagtu kooban tahay, ardayda u qalma idili ma helayaan umeerinta SES.

Waqtiyee iyo meeshee iska qori karaan barnaamijka umeerinta SES?

Arjiyada diiwaangelinta waxa laga helayaa dugsiyada ilmahaaga iyo meelo kale ee Boston ku baahsan mudada isqorida (Oktoobar 6 – Oktoobar 31, 2008), ay ku jiraan:

Aaga Bari ee "Family Resource Center F.R.C."

Campbell Resource Center
1216 Dorchester Avenue
Dorchester, MA 02124
617-635-8015
Isniin - Jimce: 8:30 AM - 5 PM

Aaga Galbeed ee "F.R.C."

Barron Building
515 Hyde Park Avenue
Roslindale, MA 02131
617-635-7719
Isniin - Jimce: 8:30 AM - 5 PM

Xarunta "Family & Student Engagement Training"

443 Warren Street
Dorchester, MA 02124
617-635-7750
Isniin & Arbaca: 8:30 AM - 7:30 PM
Salaasa, Thur & Jimce: 8:30 AM - 1:30 PM

Laanta "East Boston Satellite F.R.C."

Umana Middle School Academy
312 Border Street
617-635-9597
East Boston, MA 02128
Khamsiis, 8:30 AM - 5 PM

Aaga Waqooyi ee "F.R.C."

Madison Park Complex
55 Malcolm X Boulevard
Roxbury, MA 02118
617-635-9010
Isniin - Jimce: 8:30 AM - 5 PM

"Allston/Brighton Satellite F.R.C."

Jackson/Mann K-8
40 Armington Street
Allston, MA 02134
617-635-8532, ext. 222
Salaasa: 8:30 AM - 5:00 PM

Yaa bixinayaa umeerinta SES ee bilaashka ah?

Xiliga diiwaangelinta socoto, qoysaska u qalma baa ka xulanaya liiska Fidiyeyaal (providers) Gobolku ansixiyey. Fidiyeyaal ku waxay bixiyaan adeegyada umeerinta ee maadooyin kala duwan oo siiyaan ardayda heerarka fasalada kala duwan. Wixi tafaasiil ah ka fiiri liiska fidiyeyaal. Fadlan ogow in adeegyada umeerinta in laga sameeyo dugsiyada ilmahaaga ama meel kale.

Waa maxay su'aalaha aan ku tashanayaa markaan xulanayo fidiyaha barnaamijka umeerinta?

- Waa maxay qaybta maadada baahida tacliimeed ee ilmahaaga (xisaab, akhris, iyo/ama qorid)?
- Maalmahee baa wiigii barnaamijka la bixiyaa?

- Waqtigee baa barnaamijka la bilaabaa oo la xidhaa maalin kasta?
- Waqtigee baa barnaamijka la bilaabaa dayrtii? Waqtigee baa barnaamijku dhamaanayaa gu'ga soo socda?
- Ma heli doonaa ilmahaagu waxbarid fool-ka-fool ah amase lagu dari koox kooban ee waxbarasho?
- Qofkee baa wax baraya ilmahaaga? Waa maxay aqonta macalimiintu?
- Meeshee baa adeegyada lagu bixinayaa? Sidee baa ilmahaagu u tegayaa meesha? (*Xusuusnow, lama bixinayo gaadiid.*)
- Sidee baa fidiyuhu u daboolayaa baahiyaha ardayda naafada ah ama ardayda aan afkooda hooyo ahayn Ingiriisiga?
- Ma u baahnahay gelitaanka Internetka sidaan u helo adeegyadan?

Ma ka qayb geli karaa ilmahaagu hal barnaamij wax ka badan?

Ardayda waxa laga filayaa inay ka bilaabaan oo ku dhameeyaan barnaamijka umeerinta isla hal fidiye. Waa muhim inaad sii feejigan u xulato fidiyaha sidaan u daboolay baahiyaha qoyskaaga. Hasa ahaatee, hadii barnaamijka aad dooratay uu dabooli waayo waxad filanaysey, waxa jiri doona fursad aad ku bedelato barnaamijyada waqti sadex wiig gudahood ah bisha Janaayo. Janaayo kadib, lama ogolaanayo wax isbedel ah.

Hadii ilmahaagu u baahan yahay caawinaad xaga xisaabta iyo akhriska labadaba, ma dooran karaa hal fidiye ee xisaabedd iyo mid akhriska ah?

Maya, ilmahaagu wuxu heli karaa oo keliya hal fidiye ee umeerinta SES. Markan oo kale, waxa wacan inaad doorato fidiye umeerin kara xisaabta iyo akhriskaba.

Waa maxay shuruudaha xaadiraadu ee barnaamijyada umeerinta SES?

Arday kasta ee la qoray barnaamij umeerineed waa inuu ka xaadiraan deris kasta. Arday ka maqnaada shan deris oo isku xiga waa laga saarayaa barnaamijka.

Yaan wici karaa hadaan su'aalo dheeraad ah qabo?

- La xiriir miduun fidiyeyaalka adeega ee ku jira liiska Hagaha Diburaaca Degdega ah (*Quick Reference Guide*) xaga wixi warar dheeraad ah.
- Wixi su'aalo guud ah ee ku saabsan barnaamijka umeerinta bilaashka ah ee SES, fadlan wac Steve Desrosiers ee Xafiiska Mas'uulnimada DDB (*BPS Office of Accountability*), 617-635-6810.
- Booqo "website"-ka DDB: www.bostonpublicschools.org, oo riix "Resources For Families"
- Booqo "website"-ka Waaxda Massachusetts ee Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare: www.doe.mass.edu/ses/

Liiska Hubin Degdeg ah ee Diwaangelinta:

Markaad u doorayso sadex fidiyeyaal (providers) ilmahaaga xaqiiji in fidiyeyaalka aad dooratay:

- U adeegaan heerka fasalka ilmahaagu ku jiro (Fidiyeyaalka qaarkood uma adeegaan heerarka fasalada oo idil).
- Ay bixiyaan umeerinta qaybaha maadada ku adkaatay ilmahaaga.
- Ay ku bixiyaan umeerinta afka hooyo ee ilmahaaga (markay haboon tahay).
- U adeegaan baahiyaha gaarka ah ee ilmahaaga (markay haboon tahay).

Kahor intaadan arjiga ku soo celin dugsiyada ilmahaaga, ma:

- Buuxisay codsiyada idil ee xogta?
- Ku dartay lambarka fooniye mar walba lagaa heli karo?
- Dooratay maadada (-dooyinka) aad rabto in ilmahaagu umeerin ka helo sanadkan?
- U dooratay sadex fidiyeyaal oo kala duwan ilmahaaga?
- Saxeexday oo taariikhda ma ku qortay arjiga diiwaangelinta?

Fadlan ku soo celi arjiga dugsiyada ilmahaaga sida ugu dhaqso badan. Codsina lagama aqbalayo barnaamijka wixi ka dambeeya Oktoobar 31, 2008.